

# SHAHAADADA LA CADILEY

## 2009-2010

Shahaadada la cadiley waxaa loola jeeda tan lagu abaal mariyey ardaygii dhamaystay 24 qayb oo ka mid ah saacadihii markii la isu geeyey maadooyinkii guud ee waxbarashadda, maadooyinkii guud ee waxbarashadda ee la cadiley iyadii oo ay la jiraan ama aan lagu darin waxyaabihii aradygu ubaahnaa iyo/ama loo maray maadooyinka la cadiley. Inta badan ardayda waxay si lagu guulaystay ay uga gudbaan shuruudaha shahaadada dugsiyadda sare, siday noqotaba, degmadu waxay aqoonsantahay in tiro yar oo ardayda ahi aysan suuragal u ahayn in ay ka gudbaan manhajka rasmiga ah xataa iyadii oo lasii maray cadilidda iyo siinta dhamaan waxyaabaha ay ubaahanyihiin.

### **Maxaa loo tixgelinayaa Shahaadada la cadilay?**

Shahaadada la cadilay waxaa la bixiyey hadii ardaygu gaadho heer uu ku guuldaraystay in uu si dhamaystiran u gaadho ama ogaga soo baxo heerkii akaemiyadeed, xataa hadii la siiyey wax walba oo macquul ahaa oo uu ubaahnaa, laakiin kan soo buuxiya dhamaan shuruudaha shahaadada la cadiley sida lagu tilmaamay Gudiga Waxbarashadda ee Gobolka Oregon. Shahaadada la cadiley waxay saamaxaysaa wax ka bedelidda halkii laga filayey in uu gaadho tan gaadhka ah ee uu ubaahanyahay ardaygu isagii oo si wanaagsan isugu diyaariyey sidii uu ugu guuri lahaa nololsha qaangaadhka. Waxay usaamaxaysaa in uu horumar ka gaadho xagga xirfadda, khibradda shaqadda, iyo maadooyinka xirfadaha shaqo. Go'aanka in aad qaadata shahaadada la cadiley waxaa la gaadhi karaa wixii ka dambeeya fasalka 6aad halka aysan ahayn in ay ka dambayso 2 sanadood ka hor inta uusan ardaygu isu diyaariyey ka bixidda dugsiga sare.

Manhajka la cadiley waxaa dhici karta in uu daruuri noqdo goorta ardaygu uu umuuqdo in uusan awood ulahayn in uu oga gudbo si dhamaystiran sida uu udhanyahay heerka akadeemiyadeed, xataa hadii la sameeyey wax ka bedelid macquul ah iyo siinta dhamaan waxa uu aradygu ubaahanyahay si uu ugaadho taa iyadda ah. Arday keliya, waxaa dhici karta in loola jeedo hadii uu ardaygaasi ka gudbo maadada aljabra oo la cadiley taa oo u ogolaanaysa ardayga in uu gaadho qayb ka mid ah heerkii laga doonayay ee aljabra. Arday kale, waxaa dhici karta in ay oga dhigantahay dhamaystirka dhamaan wixii shuruudaha loo baahanyahay ee maadada xisaabta ama dhamaynta maadada xisaabta ee asaasiga ah ee heerka fasalka 6aad. Ujeedadu waxaa weeye in ardayga lagu riixo in uu horay ugu socdo tan usuuragalaysa, iyadii oo la siinayo wax walba oo ay ubaahanyihiin iyo/ama wax ka bedelidda ay doonayaan.

Ma ahan dhamaan wax ka bedelidda ama siinta wax ay ubaahanyihiin in ay saamaynayaan awooda ardayda in ay gutaan ama kasoo baxaan ujeedada maadada. Tusaale ahaan, arday itaaldaro xagga waxbarashadda ah qaba waxaa la siinayaa 504 ama IEP iyo baahida buugta cajaladaha islamarkaana uu qaato imtixaanka isagii oo afka ah si uu uheli aqoon ku filan ee Taariikhda aduunka si uu ugaadho ujeedadii laga lahaa maadada. Wax kabadelidaa/iyo siinta wax uu uubaahanyahay oo dhan kama hor istaagayso in uu meel mariyo in maadada la cadiley ama qaabkii loo qiimeynayey uu ubaahanyahay in wax laga bedelo tan ku jeeda ardayga.

Tixgelinta shahaadada la cadiley waxaa ku mid ah, walow aysan ku koobnayn, sooyaalka iyo tan imika ee gudashadda ardayga xagga macluumaadka iyo caafimaadka, xadiridda iyo dhibcaha uu haysto, iyo macluumaadka laga helo waalidka, macalinka iyo ardayga.

### **Ardaygu weli ma qaadan karaa Shahaadada Dugsiga Sare**

Macluumaadka shahaadada waxaa dib-loo-eegea sanad walba kadib markii la gaadho go'aanka ah in uu qaato Shahaadada la cadiley Ardaygu waxa uu ubedelan karaa barnaamijka Shahaadada Dugsiga Sare laakiin waa in uu gutaan dhamaan shuruudaha shahaadada dugsiga sare. Go'aanka in la qaato Shahaadada

la cadiley waxaa la gaadhi karaa oo keliya iyadii oo si taxadar leh loo eegay faa'iidada iyo khasaaraha ka iman kara hadii la ogolaado. Ardayda waxaa dhici karta in ay saacado ka dhimanaadaan hadii ay bilaabaan Shahaadada la cadiley kadibna ay doonaan in ay usoo wareegaan Shahaadada Dugsiga Sare. Tusaale ahaan waxay wax ka dhimanaan karaan saacadaha sayniska. Isbedel noocaas oo kale ah waxa uu keeni karaa in ardaygu uu dhigto dugsiga sare 4ta sanno ee sida caadiga ah la dhigto.

### **Waxyaabaha Tixgelinta Mudan:**

- Talooyinka in loo tixgeliyo ardayga barnaamijka Shahaadada la cadiley waxaa bixinaya koox ay ka qasab tahay in ay ka mid noqdaan waalidka iyo ardayga, maamulaha dugsiga ama ruuxa isaga matalaya, macalika waxbarashadda guud, la taliyaha (arday aan IEP ahayn) ama waxbarashadda gaadhka ah (arday IEP)
- Ogolaasha waalidka oo saxiixan waa shardi si loogu ogolaado ardayga Shahaadada la cadiley
- Ardayga qaadanaaya Shahaadada la cadiley waxaa laga doonayaa 24 saacdoood, ee maadooyinka uu qoray Gudiga Waxbarashadda ee Gobolka.
- Kooxda ku talisay Shahaadada la cadiley ayaa qaabaynaya jadwal ka caawin doona ardayga gaadhida ujeedooyinka uu higsanyo ardaygu islamarkaana tilmaamaya baahidda shaqadda iyo bedelka ardayga.
- Ardayga ka shaqaynaya a Shahaadada la cadiley waxaa laga filayaa in uu kasoo baxo shuruudaha shahaadada Oregon, marka lagu daro **samaynta qorshe waxbarasho** iyo dhisidda **sooyaal waxbarasho**; hal-abuurka qaabab marqaati u noqon kara in aad ka qayb qaadatay **codsiga la kordhiyey** ee heerarka manhajka ama ku dar marqaati muujinaya sooyaal waxbarasho oo horay u jiray; qiimeyn dhimaystiran ama xirfadaha asaasiga ah ee lagaa doonayo tan oo ay suuragal tahay in la cadilo.
- Waxyaabaha laga yaabo in ay saamayso Shahaadada la cadiley ogolaashaha kuliyaadaha, ka mid noqoshadda ciidamadda, ama shaqadda waa in la baadhaa xiliga la tixgelinayo khiyaarka. Waxbarashadda sare, Ciidamadda, iyo Shaqaalaynta la filayo waxaa loo adeegsan karaa dhamaystirka dugsiga iyo oo loo eegayo qaab doorasho. Caawinta Dhaqaale ee Waxbarashadda (FAFSA) waxaa dhici karta in ay xadidantahay ama aan la siin doonin ardayga qaata Shahaadada la cadiley.
- **Warqadda lagu qoro darajooyinka** waa in si muuqata loogu cadeeyaa maadooyinka la cadiley ee lagu bixiyey Shahaadada la cadiley celceliska dhibcaha guud oo la isku dari karaa ma jirto ama lagu qori karo warqadda lagu qorayo darajooyinka.
- Arday kasta oo ku leh daroogo aan sharci ahayn ama aakolo waa laga saari doonaa hadii ay cadaato in ay iska hortaagayso barashadda iyo tacliimaadka. Hadii uu ardaygu isaga tagi daroogadda aan sharciga ahayn iyo aalkoladda waxaa dhici karta in loo tixgeliyo Shahaadada la cadiley hadii ardaygu:
  - Si wanaagsan udhamaysto barnaamijkii illaalaynta iyo dhaqancelintii daroogadda iyo aalkoladda islamarkaana ay cadaato in uusan dib dambe oga qayb qadanaynin adeegsi daroogo aan sharci ahayn ama aalkolo; ama
  - Ay hirgashay dhaqancelintii lagu sameeyey oo uusan dib dambana ogaga qayb qaadana daroogo iyo aalkolo; ama
  - Uu ka qayb qaadatay barnaamijkii ilaalaynta iyo dhaqancelinta oo uusan dib dambana ogaga qayb qaadana adeegsiga daroogo ama aalkolo

March 3, 2010